



Xog Muhiim ah oo ku saabsan Cuntooyinka Dugsiga ee Ilmahaaga

Haddii ilme qoyskaaga ka tirsan uu inta badan tago dhismaha dugsiga, uu dhigto dugsiga xannaanada ka horeeya ilaa fasalka 12, uu mutaystay cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyay ee dugsiga ee loo maro Qadada Dugsiga ee Qaranka ama Barnaamijka Quraacda Dugsiga, waxa dhici karta inuu mutaysto barnaamijka Xawilaadda Elektarooniga ah ee Dheefta ee Aafada (Pandemic Electronic Benefit Transfer (P-EBT)) haddii:

- Dugsigu uu ku shaqeynayay imaansho ama saacado sidii hore ka kooban (tusaale ahaan, jadwal isku dhaf ah) muddo ugu yaraan ah 5 maalmood oo xiriir ah AMA
- Dugsigu uu gebi ahaanba onlayn wax ku dhigo muddo ugu yaraan ah 5 maalmood oo xiriir ah AMA
- Ilmahaaga la karantiilay muddo 5 maalmood oo xiriir ah ama ka badan iyadoo uu sabab u yahay COVID-19.

Intee ayuu ilmahaygu heli doonaa?

Qaddarka dheeftu waa \$6.82 ilmihiiba maalin kasta oo uu aanuu ilmuhu ka helin cunto bilaash ah ama qiime dhimis lagu sameeyey oo uu sababay xiritaanka dugsigu, imaanshaha ama saacadaha oo la dhimay, taas oo ka bilaabmaysay Oktoobar 2020. Dheefahu way isbeddeli karaan bil ilaa bisha xigta, iyadoo ku xiran inta maalmood ee ilmahaagu uu wax ku baranayay onlayn ahaan ama aanu helin quraacda ama qadada dugsiga.

Goorma ayaanu heli doonaa dheefahayaga?

Dheefaha waxa loo bixin doonaa qaab bil-le ah laga bilaabo Febraayo 2021 ilaa Ogosto 2021.

Sidee ayaanu u isticmaali karnaa dheefaha?

Dheefaha P-EBT waxaa loo adeegsan karaa in lagaga iibsado noocyada cuntada dukaanada raashinka iyo tafaariiqleyda kale ee aqbashaha Ohio Direction Card (Kaarka Adeegga ee Ohio) (oo sidoo kale loogu yeero kaarka EBT).

Sidee ayaanu ku heli doonaa dheefahayaga?

Haddii ilmuhu uu hadda qaato SNAP:

- » Dheefaha P-EBT ayaa lagu dari karaa koontada ilmuhu gunnooyinka ku qaato.
- » Haddii aan ardayga la waafajin karin koontadiisa shaqeynaysa ee SNAP, waxaa lagu soo diri doonaa kaarka P-EBT oo magaca ilmahaagu ku yaalo.

Haddii ilmuhu uusan hadda qaadan SNAP:

- » Marka la gaaro bartamaha Febraayo, waxaad heli doontaa kaarka P-EBT oo gunnooyinka cuntada lagu shubay kaas oo laguusoo dhigaayo boostada.
- » Kaarku waxaa ku qornaan doona magaca ilmaha, laguma qoraayo magaca waalidka ama masuulka.
- » Tilmaamo ku saabsan sida looga shaqeysiyo kaarka ayaa lasoo raacin doonaa.

Qoysaska hela kaar P-EBT ah oo cusub waxa WAAJIB ku ah inay haystaan kaarka si ay u sii wataan helitaanka dheefahooda bil-laha ah. Dheefaha waxaa loogu soo shubi doonaa kaarka si bil-le ah.